

Innovation Fund

Guudmarka: Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon Xafiiskeeda Dadka Waayeelka iyo Naafada ah (APD) ayaa abuuray Sanduuqa Hal-abuurka 'Innovation Fund' si loo taageero mashaariicda cusub ee bulshada ee lagu hagaajinayo adeegyada dadka waaweyn iyo dadka naafada ah. Maalgelinta loogu talagalay mashaariicdan cusubi waxay sii socon doonaa ilaa laga gaarayo Juun 30, 2023. APD waxay haysataa lacag isugeynteedu dhan tahay \$3 milyan si loogu taageero mashaariicda hal-abuurka leh, iyada oo ugu yaraan \$2 milyan loogu talagalay in diiradda lagu saaro dhanka sinnaanshaha. Mashaariicda diiradda lagu saarayo dhanka sinnaanshaha waxaa ku jiri kara kuwa u adeegaya bulshooyinka iyo kooxaha la kulmay caqabado la xiriira helitaanka adeegyo iyo taageero loogu talagalay dadka waaweyn iyo dadka naafada ah iyada oo ku saleysan aqoonsigooda iyo dabaqad la dhowrayo. Mashaariicda guulaysata ayaa la maalgelin doonaa ka dib marka la maro nidaam lagu tartamo oo ay ku jiri doonaan isku baaqid loogu talagalay soo jeedinta iyo qiimeynta dhammaan soo jeedinta la soo gudbiyey.

Soo jeedinta mashruuca iyo ururada wax codsanaya ee imaan kara:

APD waxay ururada ku dhiirigelinaysaa in ay soo gudbiyaan wax soo jeedinta loogu talagalay mashaariicda hal-abuurka leh oo wata suurtagalnimada in ay waaraan muddo dheer iyo, haddii ay khuseyso, lagu fidiyo bulshooyinka iyo kooxaha kale ee gobolka oo dhan. Mashaariicda hal-abuurka leh waxay diiradda saareen dadaallada la xiriira dhanka sinnaanshaha, APD waxay ku dhiirigelinaysaa ururada dhaqan ahaan gaarka ah in ay soo gudbiyaan soo jeedinta. Ururada dhaqan ahaan gaarka ah waxay leeyihiin tayooyinka soo socda:

- U adeegida bulsho dhaqameed gaar ah waxaana ugu horrayn ka shaqeeya oo hoggaamiya xubnaha bulshadaasi;
- Muujinta aqoonta shakhsi ahaaneed ee waayo-aragnimo nololeed ee bulshada oo ay ka mid yihiin, balse aanay ku koobnayn saameynta ay leedahay cunsuriyada qaabeynsan ee shakhsi ahaaneed;
- Aqoon ay u leeyihiin caqabadaha gaarka ah ee soo wajaha bulshada iyo sida taasi u saameyso qaabka uu leeyahay barnaamijkooda iyo adeegyadooda;
- Waxay sharrixi karaan ku dhaqanka dhaqameed ee bulshada, aaminsanaanta/ku dhaqanka caafimaadka iyo badbaadada, aqoonsiga/ku faanista/adkeysiga dhaqan ee wanaagsan, dhaqdhaqaaqa muhaajirnimada, aaminsanaanta diimeed, ama caadooyinka kale, iyo sida adeegyadoodu u qabatimeen maamuuska caadooyinkaasi.

Kala xiriir: Nakeshia Knight-Coyle nakeshia.knight-coyle@dhsoha.state.or.us wixii su'aalo ah ee ku saabsan maalgelinta. Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. APD Service Equity Communications kala xiriir APD.ServiceEquityCommunications@dhsoha.state.or.us.